IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومالية الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho 20 Maajo 1982 L. 1 R 5

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SARCI L. 13 ee 6 Maarso 1982, Dhismaha Mashruuca wax soo saarka iyo kobcinta Beeraha — Bogga 391

## QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER SHARCI Lamb. 3 ee 29 Abr. 1982, Dhismaha Wasaaradda Dooxada Jubba. » 397

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 30 ee 8 Maajo 1982, Magacaabidda Xubin Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil ma Leh. » 399

## QAYBTA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIN OGEYSIS IYO WIXII LA MID AH.

| | | |
|---|---|---|
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR. 13.5.82. Lumid Jeeg War. L. 323426 ku qoran Khaliif Nuur Aodan L. 215 | » | 400 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR. 13.5.82, Lumid Jeeg War. L. 343326 ku qoran Khaliif Nuur Aadon L. 216 | » | 401 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13.5.82, Lumid Jeeg War. L. 323428 ku qiran Khaliif Nuur Aodon L. 217 | » | 402 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13.5.82, Lumid Jeeg Wor. L. 343327 ku qiran Kholiif Naar Aadon L. 218 | » | 403 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13 5.82, Lumid Jeeg War. L. 323429 ku qiran Khaliif Nuur Aadan L. 219 | » | 404 |
| 13.5.82 Lumid Buug Keyd L. 2704 ku Qoran Caraaye Cilmi Maxamed | » | 405 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR. 18.5.82 Lumid Jeeg War. L 396671 oo ku qoran Cabdulaahi Axmed Cigaal. | «« | 406 |

MADAXA KOOWAAD
SHARCI

SHARCI Lr. 13 ee 8.3.82, Dhismaha Mashruuca wax soo saarka iyo kobcinta Beeraha.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobada 72, 78 iyo 111 ee Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Inay tahay lagama maarmaan in la dhiso Mashruuc sucub oo Madax bannaan, laguna magacaabo Mashruuca Wax soo Saarka iyo Kobcinta Miraha Beeraha.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Talada uu soo jeediyey Guddoomiyaha Hoggaanka Iskaashatooyinka ee X.H.K.S;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aanka Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ee G.S.K;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

Qodobka laad

*Dhismaha Mashruuca*

1. Waxaa halkan lagu dhisay «Mashruuca Wax soo Saarka iyo Kobcinta Miraha Beeraha» hadda ka dibna lagu tilmaamayo «Mashruuc»;

2. Mashruuca wuxuu noqonayaa mid u madax bannnaan Maamulka iyo Farsamada, wuxuuna leeyahay awood jiritaan iyo shakhsiyad Sharciyeed;

3. Mashruuca wuxuu hoos yimaadaa Hoggaanka Iskaashatooyinka ee X.H.K.S;

4. Mashruuca wuxuu yeelanayaa Darajada «A». Mushaarooyinka iyo gunnooyinka Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaasha waaxyaha Mashruuca, waxay la mid noqonayaan kuwa Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaasha Mashruuca Faanoole.

Qodbka 2aad

*Xarunta Mashruuca*

1. Xarunta Mashruuca waxay noqoneysaa Magaala madaxda Gobolka J/Hoose ee Kismaayo;

2. Haddii loo baahdo Mashruuca wuxuu Gobollada iyo Degmooyinka ku yeelan karaa Laamo:

Qodobka 3aad

*Ujeeddooyinka Mashruuca*

Ujeeddooyinka Mashruuca waxay yihiin:

1. Dib u habeynta, toosinta iyo horumarinta beeraha Dowladda iyo dhisidda Beero cusub;

2. Beeridda iyo horumarinta miraha kala duwan ee waxtar u leh Dalka sida Mooska, Pompelmada, Suufka, miraha saliidda Iwm;

3. Diyaargarowga, farsameynta iyo ka iibinta Hay'adaha ku-shaqo leh iyo ciddii kale ay khuseyso;

4. Abuuridda kaadar Soomaaliyeed ee maamula Beeraha.

Qodobka 4aad

*Awoodda*

Mashruuca wuxuu leeyahay awood uu ku fulin karo ujeeddooyinka ku xusan Qodobka 3aad.

Qodobka 5aad

*Qaabka Mashruuca*

1. Mashruuca wuxuu lahaanayaa Qaabka soo socda:

B)— Maareeyaha Guud.
T)— Waaxda Farsamada iyo Brojettooyinka,
J)— Waaxda Beeraha,
X)— Waaxda Maamulka,

2. Mashruuca wuxuu yeelan karaa waaxyo kale, qaybo iyo Laamo.

3. Hawlaha Waaxyada, Qaybaha iyo Laamaha waxaa lagu caddeyn doonaa Xeernidaamiyaha.

Qodobka 6aad

Magacaabidda Madaxda Mashruuca

1. Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaasha waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, isagoo dhegeystay talo soo jeedinta Guddoomiyaha Haggaanka Iskaashatooyinka ee X.H.K.S.

2. Maareeyayaasha Waaxyada waxa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, isagoo tixgelinaaya talada Guddoomiyaha Hoggaanka Iskaashatooyinka ee X.H.K.S.

3. Madaxda Qaybaha iyo Laamaha waxaa magacaabaya Maareeyaha Guud.

Qodobka 7aad

Hirgelinta Mashruuca

1. Guddoomiyaha Hoggaanka Iskaashatooyinka ee X.H.K.S. Wuxuu awood u leeyahay inuu tusaalooyin siiyo Mashruuca, ayadoo la hormarinaayo ujeedooyinka loo dhisay Mashruuca.

2. Mashruucu wuxuu u madax bannaan yahay inuu ka hortago, islamarkaana uusan oggolaan wax allaale wixii hakinaya habsami u socodka horumarinta Mashruuca.

Qodobka 8aad

Awoodda Maareeyaha Guud

1. Maareeyaha Guud ee Mashruuca wuxuu leeyahay awood buuxda uu ku hirgeliyo mashruuca, wuxuuna mas'uul ka yahay:

B)— Fulinta ujeedooyinka Mashruuca,
T)— Maamulka Guud ee Mashruuca,
J)— Kormeerka, asluubta iyo daryeelka shaqaalaha,
X)— Diyaargareynta barnaamijka guud ee mashrjca,

KH)— Saxiixa heshiisyada Mashruuca khuseeya,

D)— Soo iibsashada Dalka gudihiisa ama dibedda qalabka, gaadiidka bacrinta iyo daawooyinka lagala hortago cayayaanka iyo cudurrada beeraha gala.

2 .Maareeyaha Guud wuxuu kaloo awood u leeyahay inuu shaqaalaha muujiyey dadaal dheeraad ah siiyo abaalmarin lagu dhiiri geliyo, islamarkaana aan joogta ahayn (Part-Time) in uu siiyo gunnooyin.

Qodobka 9aad

**Shaqaalaha**

1. Mashruuca wuxuu qoran karaa shaqaalaha Soomaaliyeed ee uu u baahan yahay isagoo raacaya Sharciga qoridda shaqaalaha.

2. Mashruuca wuxuu awood u leeyahay inuu gudaha amase dibedda ka qoran karo khubaro shisheeye ah haddii loo baahdo, isagoo raacaya sharciyada Dalka u degsan, lana tashanaya Guddoomiyaha Hoggaanka Iskaashatooyinka ee X.H.K.S.

Qodobka 10aad

**Hantida Mashruuca**

Hantida Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:

1. Deeq laga siiyo Miisaaniyadda Dowladda;

2. Deyn uu ka qaato Bunuugta;

3. Deeq uu ka helo Dowlado kale, shirkado iyo Ururrada Caalamiga ah;

4. Wixii lacag ah oo ka soo galo hawsha uu Mashruuca u qabto cid kale;

5. Hantida ma guurtada iyo guurtada ee horey loogu maamuli jirey Mashruuca beeraha ku xusan qodobka 11aad ee Sharcigaan iyo kuwa uu yeelan doono mustaqbalka dambe.

Qodobka 11aad

**Ka Wareejin**

1. Iyadoo uu Mashruuca yahay mid cusub una baahan yahay maalgelin lagu meel mariyo, ayey Wasaaradda Maaliyadda la wareegi doontaa wixii deyn horey loogu lahaa beeraha hoos imaan doona Mashruuca, kuwaasoo ah: Beerta Maroodi, Beerta Mazzi, qaybta ay Wakaaladda Mooska ku leedahay Beerta Romanelli, Beerta oo idil oo Wakaaladda Mooska ay horey u lahaan jirtey una maamusho una maamuli jirtay sida: 6/G, 21/G, 23/G, 46/G, 69/G, 44/G, Agoonta Ilmo Xaaji Xasan, Abuur badinta/G, Mishaani, Abuurbadinta/Sh, Beerta Maxamuud Cabdi Nuur, Beerta Romana iyo Beeraha ADC sida: Beerta Jowhar, Sablaale Yarow, Beerta Arbow Heerow, Beerta Hargeysa, Beerta Jamaame.-

2. Sida uu dhigayo Sharciga Dhulka beeraha 73 ee 1975 waxaa Wasaaradda Beeraha la wareegeysaa beeraha Dowladda iyo kuwa gaarka ah oo aan la beerin muddo labo sano wixii ka badan, waxayna ku wareejinaysaa Mashruuca.

Qodobka 12aad

**Heshiis**

Mashruuca wuxuu la geli karaa heshiis «Joint Venture» Shirkado shisheeye ama ganacsato Dalka gudihiisa ama dibeddiisaba, kaddib marka loo baahdo ayadoo lala tashanayo Guddoomiyaha Haggaanka Iskaashatooyinka ee XHKS iyo Wasaaradda Beeraha lana tixgelinaayo Sharciga maalgelinta ee Lr. 7 soona baxay 29.1.1977.

Qodobka 13aad

**Dhiirri Gelin Tacab Kordhin**

Shaqaalaha Dowladda ee Xaqada ka taga ama ciddii kasta ee damacsan inay beero sameysato, waxay warsan kartaa Mashruuca oo awood u leh inuu u oggolaado una habeeyo ujeeddo badan, isagoo la kaashanaya Hoggaanka Iskaashatooyinka ee X.H.K.S. iyo Wasaaradda Beeraha.

## Qodobka 14aad

**Canshuur ka dhaafid**

Waxaa sharcigan Canshuur ka dhaafid loogu oggolaaday gaadiidka, qalabka, bacrinta daawooyinka lagu ciribtiro cayayaanka iyo jirrooyinka beeraha ee uu Mashruuca ka soo iibsanayo dibedda.

## Qodobka 15aad

**Xuquuqda qaanuuniga ee shaqaalihii horey uga tirsanaan jirey Beeraha**

Shaqaalihii horey uga tirsanaan jirey beeraha laga dhisay Mashruuca Wax soo saarka Kobcinta Beeraha, waxay xuquuqdoodii u bislaatay ka hor intaan la dhisin Mashruuca ay ku yeelan doonaan Hay'adihii ay ka tirsanaayeen.

## Qodobka 16aad

**Tirtirid**

Waxaa la tirtiray Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

## Qodobka 17aad

**Xeer-Nidaamiye**

Madaxweynaha J.D.S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaaya talada Guddoomiyaha Hoggaanka Iskaashatooyinka ee X.H.K.S. inuu soo saaro Xeer-Nidaamiye lagu faahfaahinayo laguna fulinayo Sharcigan.

## Qodobka 18aad

**Dhaqangelin**

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa marka uu Saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 8.3.1982

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD
XEER

XEER-SHARCI Lr. 3 taariikh 29.4.1982, Dhismaha Wasaaradda Horumarinta Dooxada Jubba.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 41 ee 3dii Juun 1962, kuna saabsan Nidaamka Dawladda, iyo beddelaadyadii ka dambeeyey;

MARKUU TIXGELIYEY: Ahmiyadda weyn oo ay u leedahay dhaqaalaha Dalka horumarinta Dooxada Jubba, marka laga eego xagga beeraha, xoolaha, kalluumeysiga iyo warshadaha la xiriira, horumarinta infarastrasharka, curinta xoogga korontada iyo habsami u isticmaalka biyaha Webiga Jubba;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la dhiso Wasaarad Qaranka uga mas'uul ah horumarinta kheyraadka Dooxada Jubba;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka-sharci ee soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la dhisay Wasaaradda Horumarinta Dooxada Jubba.

Qodobka 2aad

Wasaaradda Horumarinta Dooxada Jubba waxay mas'uul ka tahay xilka horumarinta iyo maamulka guud ee dhaqaalaha iyo bulshada ee Dooxada Jubba. Waxay kaloo mas'uul ka tahay maamulka iyo ka faa'iideysiga biyaha Webiga Jubba.

Qodobka 3aad

Wasaaradda waxaa xilkeeda gaarka ah ka mid ah:

a) Baarista iyo caddeynta kheyraadka dabiiciga ah iyo diyaarinta daraasadaha ku saabsan ilaha dhaqaale ee cusub ee Dooxada;

b) Qorsheynta, fulinta iyo maamulka dhammaan mashaariicda laga hirgelinayo Dooxada, ha noqdeen kuwa jira, ama kuwa la abuuirdoono, iyadoo lala kaashanaya Wasaaradda ku shaqada leh;

t) Abaabulka iyo raadinta maalgelinta mashaariicda Dooxada ayadoo la kaashanaya Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Qorsheynta Qaranka iyo Wasaaradda Arrimaha Dibedda;

j) Horumarinta iyo dhiirrigelinta wax-soo-saarka mashaariicda Dawladeed iyo kuwa gaar ahaaneedba ee Dooxada;

x) Kormeerka iyo hubinta habsami u socodka mashaariicda Dooxada.

Qodobka 4aad

Wasaaraddu waxay yeelaneysaa qaab u gaar ah oo lagu soo saari doono Xeer-Madaweyne, la dhegeystay Wasiixrka Wasaaradda Horumarinta Dooxada Jubba iyo Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Qodobka 5aad

Xeerkan-sharci wuxuu dhaqan gelayaa laga billaabo 1da Maarso 1982, waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 29.4.1982

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, lambar 30 taariikh 8 Maajjo 1982, Magacaabidda Xubin Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil Ma Leh.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 28, taariikh 7da Maarso 1982 oo lagu magacaabay Guddoomiyaha iyo Guddoomiye-kuxigeennada Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil Ma Leh;

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in la xoojiyo Guddiga kor ku tilmaaman, loona magacaabo Xubin cusub.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Jaalle Cabdullaahi Warsame Nuur waxaa loo magacaabay Xubin Guddiga Qaranka ee Xisaabi Xil Ma Leh.

Qodobka 2aad

Dhanka dhaqaalaha, darajada xubinta ku tilmaaman Qod. 1aad ee Xeerkan waa heer Wasiir.

Qodobka3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Dasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 8 MAG. 1982

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU XAQIIQSADAY: Lnuu Dhumay Jeegga Wa. Lambarkiisu ahaa 323426 Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Jamame kuna qoran Lacag dhan Sh. So. 50.000 uu iska lahaa Khaliif Nuur Aadan sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 01223 Taariikhdu 13.5.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Jamaame.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lambarkiisu Yahay 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la Qiimetiro (Amortamento) Jeegga Wareega Lambar 323426 oo ku qoran magaca Khaliif Nuur Aadan ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WAXUU U FASAXAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Jamaame in uu siiyo Khaliif Nuur Aadan Lacagta ku Qoran Jeegga Wareega kor ku tilmaaman kadib Markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Beri Marka Go'aankaan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Waxaa la Amraayaa

In Go'aan lagu Daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya lana Gaarsiiyo Laanta Jamaame ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 13.5.82.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 215

# MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU XAQIIQSADAY: Inuu Dhumay Jeegga Wa. Lambarkiisu ahaa 343326 Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna qoran Lacag dhan Sh. So. 50.000 uu iska lahaa Khaliif Nuur Aadan sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 01228 Taariikhdeedu 13.5.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lambarkiisu Yahay 2 ee 9.9.65.

## WUXUU XEERIYEY

In la Qiimeyntiro (Amortamento) Jeegga Wareega Lamb. 343326 oo ku qoran magaca Khaliif Nuur Aadan ayna ku jirto Sh. So. 50:000/=.

## WAXUU FASAXAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo in uu siiyo Khaliif Nuur Aadan Lacagta ku qoran Jeegga Wareega kor ku tilmaaman kadib Markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Beri marka Go'aankaan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

## Waxaa la Amraayaa

In Go'aan lagu Daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyo lanta gaarsiiyo Laanta Kismaayo ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 13.5.82

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 216

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU XAQIIQSADAY: Inuu Dhumay Jeegga Wa. Lambarkiisu ahaa 323428, Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Jamaame kuna qoran Lacag dhan Sh. So. 50·000 uu iska lahaa Khaliif Nuur Aadan sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 01228 taariikhdu 13.5.82 ee Ba nkiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Jamaame.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lambarkiisu eeYahay 2 ee 9.9.65.

WAXUU XEERIYEY

In la Qiimeyntiro (Amor amento) Jeegga Wareega Lamb. 323428 oo ku qoran magaca Khaliif Nuur Aadan ayna ku jirto Sh. So. 50·000/=.

WAXUU U FASAXAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Jamaame in uu siiyo Khaliif Nuur Aadan Lacagta ku qoran Jeegga Wareega kor ku tilmaaman kadib Ma: rkey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Beri Marka Go'aankaan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyo Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Waxaa la Amraayaa

In Go'aan lagu raabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya lana Gaarsiiyo Laanta Jamaame ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 13.5.82.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 217

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU XAQIISADAY: Inuu Dhumay Jeegga Wa reega Lambarkiisu ahaa 343327 Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laa nta Kismaayo kuna qoran Lacag dhan Sh. So. 50.000-uu iska lahaa sida ku cad Warqadda Lamb. 01228 taariikhdeedu, 13.5.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lambarkiisu yahay 2 ee 9.9.65.

WAXUU XEERIYEY:

In la Qiimeyntiro (Amortamento) Jeegga Wareega Lamb. 343327 oo ku qoran magaca Khaliif Nuur Aadan ayna ku jirto Ss. So. 50.000/=.

WAXUU U FASAXAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laa nta Kismaayo in uu siiyo Khaliif Nuur Aadan Lacagta ku qoran Jeegga Wareega kor ku tilmaaman kadib Ma rkey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Beri marka Go'aankaan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Waxaa la Amraayaa

In Go'aan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee Jam huuriyarda Dimuqraadiga Soomaaliya lana Gaarsiiyo Laanta Kismaayo ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 13.5.82.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 218

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU XAQIIQSADAY: Inuu dhumay Jeegga Wareega Lambarkiisu ahaa 323429 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta JAMAMA kuna qoran Lacag dhan Sh. So. 50.000 uu iska lahaa Khaliif Nuur Aadan sida ku cad warqadda Lambarkeedu yahay 01228 taariikhdeedu tahay 13.5.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta JAAAMA;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lambarkiisu yahay 2 ee 9/9/65.

WUXUU XEERIYEY

In la qiimetiro (Amortamento) JEEGGA WAREEGA Lam. 323429 oo ku qoran magaca KHALIIF NUUR AADAN ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=

WUXUU U FASAXAAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta JAMAAMA in uu siiyo KHALIIF NUUR AADAN Lacagta ku qoran Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman kaddib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Beri marka Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan is-hortaag laga keenin.

WAXAA LA AMRAYAA

In Go'aan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, lana gaarsiiyo Laanta JAMAAMA ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 13.5.82

GUDDOOMIYAHA MAX. G. BANAADIR
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 219

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU HUBSADAY: In Buug Keyd dhumay oo Lambarkiisu ahaa 2704 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afaraad kuna qorneyd Lacag dhan Sh. So. 6.000 uu iska lahaa Caraaye Cilmi Maxamed sida ku cad Warqadda Lamb. 326 Taariikh 13.5.82 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 9.9.65.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 2704 oo ku qoran magaca Caraaye Cilmi Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 6.000/=.

### WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Afaraad u beddelo Jaalle Caraaye Cilmi Maxamed buugga Keydka), ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 13.5.82.

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

GUDDOOMIYAHA MAX. G. BANAADIR

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU XAQIIQSADAY: Inuu Dhumay Jeegga Wareega Lambarkiisu ahaa 396671 Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qoran Lacag dhan Sh. So. 40.000 uu iska lahaa Cabdulaahi Axmed Cigaal sida ku cad Warqada Lambarkeedu 004211 Taariikhdeeduna 18.5.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Lxnta Dhexe.

HADUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lambarkiisu yahay 2 ee 9.9.65.

WAXUU XEERIYEY

In la Qiimeyntiro (Amortamento) Jeegga Wareega Lamb. 396671 oo ku qoran magaca Cabdulaahi Axmed Cigaal ayna ku jirto Sh. So. 40.000/=.

WAXUU U FASAXAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe in uu siiyo Cabdulaahi Axmed Cigaal Lacagta ku qoran Jeegga Wareega kor ku tilmaaman kadib Markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Beri marka Go'aankaan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqsaadiga Soomaaliya Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Waxaa la Amrayaa

In Go'aan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya lana Gaarsiiyo Laanta Dhexe ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 18.5.81

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR
W.S. Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax